# Golaha Wakiilada JSL

## <u>Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda</u>

## <u>Kal-fadhiga 31^aad^</u>

## <u>Fadhigii 2^aad^</u>

## 24 July 2016

**Fadhigu Wuxuu furmey 9:54 AM**

**Gudoomiyaha: -**Baashe Maxamed Faarax

**Ajendaha Fadhiga: -**<u>Dooda Ajandaha Kal-fafhiga **31**aad.</u>

**Gudoomiyaha:-**Maanta waxaynu u balansaneyn dooda Ajandahay Kal-fadhiga 31aad ee Golaha wakiilada, xoghaynta waxaan ka codsanayaa in soo qoraan xildhibaanada dooda ka qayb qaadanaya.

**Md. Axmed ducaale Bulaale: -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa waxaan ugu horaysiinayaa oo aan soo jeedinayaa qodobka 4aad ee ah wax ka *badalka iyo kaabista xeerka doorashooyinka golaha wakilada*, waxaa kale oo iyana jira xeerar sanadadii danbe oo dhanba ku jiray oo ay ka mid yihiin xeerka caasimadu.

Waxaanan leeyahay xeerkaasi kaabis iyo wax ka badel midna uma baahnee waxaa la isku hayaa waa qodob kaliya ee qodobkaa halaga saaro ayaan odhan lahaa, waayo waa qodob mabdi'iya oo ah saami qaybsiga kuraasta kaasina maaha mid hada golaha u yaala ee waa mid mujtamaca ama qaranka u yaala.

Taasina waa mid uu u xanibanyahay xeerkaasi, markaa golaha wakiiladu xeerka uma xanibna ee waxa uu u xanibanyahay qodobkaa mabdi'iyanka ah oo ah sida kuraasta loo qaybsanayo waana in laga saaraa Ajandaha waxaa kale oo aan leeyahay in isna meesha laga saaro *xeerka argagixisada* oo waxaan la qabaa xildhibaanada iga horeeyay

Waxaa kale oo meesha ku jira xeerka caasimadu oo 10kiisano ee ugu danbeeyayba ku jiray, xeerkaa caasimaduna waa xeer aad u balaadhan oo u baahan in laga heshiiyo principle kiisa kaasna waxaan leeyahay halaga saaro meesha, waxaa kale oo jira xeer

meesha ku jira oo aan laga hadal ayaa jira xeerka deegaanka national environmental act oo aan leeyahay xeerkaa hala soo hormariyo, waayo ma dareeno khatarta ka taagan deegaanka, waxaa lagayaabaa in aan eegno khatarta ka taagan dhaqaalaha, sidaa awgeed waxaan leeyahay xeerkaasi waana in aanu kalfadhigan aanu inala dhaafin ee aan ansixinaa.

Waxaa kale oo aan rabaa in aan ugu danbaysiiyo xeer hoosaadka golaha wakiilada anigu waxaan ku jiraa gudida joogtada ah wakhti fogna wuu naga soo gudbay oo shirgudoonka ayuu horyaalaa, sidaa awgeed waxaan leeyahay xeerka inta aynaan wax kale galin xeerkaa aan ansixin. Waayo tafsiirkiisu waxaa uu noqonayaa in golahaa dhami aanu lahayn xeer hoosaad waxaanan leeyahay wixii aan ka soo badelaynay waanu ka soo badelnay ka gudi joogto ahaan, imaatin la'aanta iyo soo xaadir la'aantuna qayb ayuu ka yahay inuu xeerkaasi shaqayn waayo oo xildhibaanadu ay ka soo qayb gali waayayaan fadhiyada.

Sidaa awgeed shirgudoonku waxay ka soo badelayaan ha ka soo badeleen anana aad ayaan uga soo shaqaynay oo workshops ayaan ka soo qabanay, doodo ayaan laga soo qabtay oo wakhti dheer ayaa ku luminay ka shaqayntiisa waxaanan leeyahay in loogu horaysiiyo waanad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** goluhu wuu salaamanyahay shirgudoonkana waan salaamaya ajanduhu sidaa uu u dhiganyahay waa si wanaagsan ayaan leeyahay rayi ahaan labada ugu horeeya ee arimaha maaliyada iyo hanta dhawrka horaa gudi loogu saaray gudida maaliyaduna lifaaqyo ayay raacisay waxayna ila tahay in lifaaqyadaa la raaciyo laguna ansixiyo hana ugu horeeyaan ayaan odhan lahaa. Qodobka 7aad ee aqandaha waxaan leeyaha waa qodobo mihiim ah ee halagu soo daro.

Waxaa kale oo xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen in laga saaro xeerka ka ganacsiga baananka waayo waa la ina habaaray ayaan maqlayay, waxaa ka dhacay somalilandtan aan joogno, ma qaadkaa la habaaraa, ma sinadaa la habaaraa, maxaa la habaaraa intee danbi ka dhacda inta la leeyahay ha lahabaaro baaranka, waxaanay ila tahay habaarkaasi halkiisa ma aha.

Aan qaynuunka hagaajino lagu maamulayo baanan islaami ah aanan keeno baanan aan ribo lahayn waxaan leeyahay ayaan umada dhaqaaleheeda indhaha laga ridin waa wax loo baahan yahay wixii xumaan ah halaga saaro xeerkaana waa in sidii saa loo daayaa lagana shaqeeyaa wixii qaladaad ahna waa in laga saaraa. Ceebna way inagu tahay in la yidhaa meesha halaga saaro meesha.

Xeerka doorashada Golaha Wakiilda hadii wax ka dhimanyihiin waa qabyo waana in laga shaqeeyaa meeshii doonaba halagaga shaqeeyee waa in laga shaqeeyaa oo isaga oo dhamaystiran la keena ee yaan laga saarin ayaan odhan lahaa. Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada waa qaynuunka ina qabanaya hadii aan xildhibaano nahay waayo inaga oo laba bilood iyo maalmo maqnayn ayuu kooramkii inoo dhamaan waayay, sidaa awgeed maxaa qabanaya xildhibaankii la soo doortay waxaan leeyahay xeerkaa aan wax ku darno oo ha noqdo xeer wax qabta ee yaan meesha laga saarin Inta kale ee ajandaha waa in sidiisa loo daayaa, waanad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Maxamed Cige:-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanadaba waan salaamayaa wixii aan odhan lahaa xildhibaana ayaa ka hadlay laakiin waxaan ka hadlayaa woxogaa, waxaan ugu horaysiinayaa xeerka argagixisada oo waxaan leeyahay kalmadan lafteeda ayaaba ah dhaawac ah e waa in degdeg looga saaraa ama wax kale lagu sheegaa, sababtuna waxaa weeyi mar hadii la yidhi argagixiso ayaa jirta, oo inagu argagixisaba maynaan arage ilaahay ha inaga haye waa in la isweydiiyaa maxaynu dhibaato ku qabnaa ilayn in aan isku soo jeedino maahee qodobkaasi in uu meesha ka muuqdaa inaka ayay dhib inagu tahay.

Xeerka caasimadu in badan ayuu meesha ka muuqdey markii aan daba galay ee aan is idhi wax ka fahana waxba waan ka fami waayay, waxaanse u qaatay in la leeyahay caasimada Somaliland meesha laga dhigayo ha laga heshiiyo oo sida dastuurka ku qoran ay tahay in caasimada Somaliland ay tahay Hargaysa, hadiiba la soo qaad qaado oo la yidhaa caasimada halkee laga dhigayaa, Somaliland halka kala badhana waa la yaqaan oo waxaa layidhi waa war-idaad.

In layidhaa ha la eego oo meesha caasimada Somaliland ay noqonayso ha la isla eego waan raacsanahay, xeerka baananka waxaan qabaa dawlad aan lahayni dawlad maaha waxaana is weydiin leh sidee ayaad dawladaha kale loola macaamilayaa aduunkan aan ku noolnahay marka aan leenahay wadadiisii aan xidhnee waayo xukuumad aan wexeega aan LC la marina aduunyada ma jirto.

Mar hadii aan ka wakiil nahay dadweynahay waa in aan ilaalinaa dadweynaha maalkooda habaarka la sheegayaana iska keen qaban maayo hadii aynaan danbiba lahay waana in si deg-deg ah loo ansixiyaa xeerkaa baananka.

Xeerka Golaha Wakiilada aniga waxay ila tahay si hadalkiisu u dhamaado waa in la soo dedajiyaa oo loogu soo horaysiiyaa si uu hadalkiisuba u dhamaado, oo sida xildhibaanadii hore sheegeen in la is ogolyahay intaa waa in la soo dhigaa ayaan odhan lahaa, dhan kale xildhibaanada leh waa inuu ina hogaamiyo wuuba ina hogaamiyaaye

waa uu u cuntami waayay ayaan filayaa waxaa kale oo aan aad iyo aad u taageerayaa in kastoo xildhibaano la soo doortay yihiin hadana waa in la xakameeyaa waayo sidan aan hada nahay siba maaha.

Waa in la helaa wax ina qabta oo dariiqa toosan inagu soo rida, waayo dadka qaar ayaa waxay yidhaahdaan xildhibaanada qurba jooga ah ayaan ka soo xaadirin golaha taasi waxaan leeyahay waa waxba kama jiraan oo anaga ayaa ka imid qurbaha maalina ma maqnaado. Xildhibaano umada aan musharka ka qaadano waa in aan si wanaagsan ugu shaqaynaa si wacana aan ugu adeegno.

**Md. Xassan Cawaale Caynaan:-** shirgudoonka iyo golahaba waan salamayaa, runtii maanta waxaan odhan lahaa xeer hosaadka ha loo soo horaysiiyaa waxaanan ku xigsiin lahaa xeerka caasimada waanan in la xigsiiyaa golaha wakiilada, waxaa kale oo aan meesha ka saari lahaa xeerka kufsiga waayo xeerkaa kufsigu ma haboona in halkan lagu soo daraa ama laga dooda.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in xeerka ka ganacsiga baanan ka sidiisa loo daayo oo laha doodaa oo wixii dhib ah eek u jirana waa in laga saaraa waana in la ansixiyaa waxaa kale oo aan meesha ka saari lahahaa xeerka argagixisada waan in meesha laga saaraa, waxaa kale oo aan mar labaad iyo mar sadexaad iyo mar afraadba soo jeedinayaa in xeerka caasimada loo soo horaysiiyo lagana shaqeeyo lana ansixiyo waad mahadsantihiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** waxaan salamayaa shirgudoonka mudanayaasha kaaliyayaasha waxaan ku hadlayno qoraya, mudanayaal habaar ma jiro ee waxaa jira qofku hadii uu qalad sameeyo wax loo ciqaabayo taas ayaa jirta culimaduna waa in ay ina waa nisaa oo wixii khalad ahba inoo sheegaan. Wixii dastuurka iyo diinta khilaafsan waa in aynaan ku dhaqaaqin.

Waxaa weeyi wax diinta ka soo hor jeeda hadii aan gacanta u taagno baarlamaanka oo dhami waa ceeboobayaa ilaahayna danbiga wuu ku qaadayaa, waxaa weeyi xeerkan dhawrka jeer soo noqnoqday hadii uu jiri lahaa xeer hoosaad ina xukumayaa wuu bixi lahaa, sidaa awgeed waxaan ku talin lahaa xeer hoosaadkaa ina xukumaya waa in xaga hore la keenaa waayo fasaxeena waxaa la soo qadimay 5 maalmood 5 maalmoodna waan ku darsanay walina waynu maqanahay, sidaa awgeed hadii uu jiro xeerhoosaad ina xukumayaa taasi may dhacdeen ee way ka bixi lahaayeen golaha qaar cusubna way iman lahaayeen.

Waxaa kale oo jira oo aan soo jeedinayaa in meesha laga saaro xeer ay hay'adi keentay oo UNtuna Fun-garaysay waa in meesha laga saaraa, waayo ma aha in ay hay'adi wax inoo keento ee waa in baarlamaanku keenaa, xilbaana ka saaran xildhibaanada, hadii aanay dawladu dhamaystirin waa in aan keenaa wixii umada dan u ah waa in aan ka shaqaynaa.

Waxaan ugu horaysiin lahaa xeer hoosaadla golaha wakiilada, waxaa kale oo aan leeyahay sidii xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen waa in xeerka doorasahada golaha wakiilada waa in laga soo heshiiyaa ee aan golaha lagu soo riixin.

Waxaa kale oo aan meesha ka saarayaa xeerka argagixisada waayo waxaa inoo yaala xeeka ciqaabta guud ee waa in aan kaa istic maalahaa. Waana in meesha laga saaraa ayaan soo jeedin lahaa.

Waxaa kale oo aan leeyahay xeerka caasimada sidii xildhibaankii iga horeeyay sheegay in hadii layidhaa caasimadu halka ay ku haboontahay ha la eego waan taageersanahay arintaa oo waxaan leeyahay caasimada ha lagu celiyo sheikh ayaan taageerayaa.

**Md. C/qaadir X. Ismaciil Jirde:-**Bismilaahi Raxman Raxiim, horta waxaynu ka doodeynaa waa ajende shir-gudoonkana waxaan jeclaa markuu qofkii qodobkii meesha ku yaaley sida Xeer-hoosaadkii uu gudo galo oo ka doodo dee waxay aheyd inuu dooda arrintaas la sugo marka la gaadho, doodani waa ha lagu daro iyo ha laga saaro dooda ajenduhu, iminka laakin waxaa arkayaa in dooda sida caasimada ha la raro iyo dodo kale la galey, markaa taas shir-gudoonku ha xakamaeeyo.

Xeerarku waxay isu raacaan hab-tirsi qaarna waa wax dhaqaale ku saabsan iyo maamul iyo qaarna waa kuwo nabadgalyo, kuwii nabadgalyada Siciid baa sheegay oo qaar baa maqan waliba Madaxweynaha ka soo noqdey sida Xeerkii Booliiska iyo Xeerkii Xabsiyad iyo kii procedure-kii Maxkamadaha, marka horta waxaas oo dhan waa isku hab-tirsi ee in meel la wada mariyo ayaa ku haboon, inagaana xildhibaano ah yaana suuqa la inaga xukumin oo la odhan meel baa sidaa laga yidhiye Baarlamaanow ka joogso, dad caqli leh baynu, dad diinta yaqaan beynu nahey, wixii diinta ku xun cidii heysaa ha ka saarto, laakiin gacmo duubnaada meelbaa laga hadlaye Xaamudo yeeli meyno, markaa yaynaan inagu is yasin ileyn wixii xumaada marjac aynu kula noqono ayaynu heysanaa, hadii kale inaga dareeriya meesha.

Xeerka Caasimada ee laga hadlayo, waxaan odhan lahaa war dadka ha iska hor keenina, Xeerka Caasimada ee laga hadlayaa waxa weeye Caasimada Gobolka ma laga dhex saaraa oo meel Gobolna aanu xukumin ma noqotaa sida Caalamka oo dhan Addisababa

ayaa ka mid, London baa ka mid Nairobi baa ka mid ah mana aha wax inaga inagu gaar ah, wax reer loogu daneynayona maaha.

**Point of order Gudoomiye Baashe**:- Xildhibaan Bukhaari iyo Xildhibaan Xasan Cawaale markuu xildhibaanu hadlayo ha la dhageysto.

**Md. C/qadir Jirde (sii watey hadalka):-**waa wax qeynuuni ah, hadeynu qaadano way fiican tahey, hadii la diidona waa sideedii, laakiin dadka ha iska horkeenina oo dadka colaad ha isu galina xildhibaana tihiin oo waxaad ku hadleysaan shacbiguu u tagayaa ee shacbigana ha kala qeybinina halkaasey iman doonta, iminka waliba wakhtigeedii ma taagna, laakiin way iman doontaa oo hadeynaan sameyn kuwa inaga dambeeyaa sameyn doona.

Xeer horta marka la magacaabo magaabistu door bay ka qaadataa oo Xeerka waxay u abuurtaa colaada oo dadku way ka didaan marka magaciisa la khaldo oo kalmada tafsiirkeeda la khaldo waa wixii xamar ka taagnaa oo erey bixinta tafsiirkeedii baa la khalday oo wixii la arkay oo dhan ay ka dhacday, Xeerku sida Xildhiban C/raxman u sheegay waa Xeerka Ka-hortaga Kufsiga waana Xeer Ciqaabeed sida Xildhiban Maxamed Saalax u sheegay, markaa waxaan soo jeedinayaa Xeerka Magacaa ku qoran aynu ka badalno oo sidaa aynu ka dhigno, magacuna waa kan keenaya colaada in lagu qeyliyo.

Xeerka Argagixisada sida uu u qoran yahey waa khalad, Xeerkana Warbixintiisii Gudidda Wali Golaha may keenin, markii horena hay'ad kamuu imane Xukuumaduuinooga yimi Xeerku oo Golaha Wasiirada ayuu ka yimi, laba nuqul baa la keenay, muran baa ka taagan gudidda gacanta ku heysa oo Wali mey keenin, markaa waxaan leeyahey intuu gudidda ka soo dhamaanayo ajendaha ha laga saaro, laakiin aynu celino waa habaar, waa xeer xukuumada inooga yimi oo waajib inagu tahey inaynu ka shaqeyno, marka wakhtigeeda aynu galne mar hadaaney gudiddii keenin ajendaha aynu ka saarno inta uu naga soo dhamaanayo ayaanu codsaneynaa hadaanu Gudidda gacanta ku heysana nahey.

Xeerarka soo noqda, waliba kuwa Madaxweynaha ka soo noqda waa inay safka hore soo maraan waayo Xeerar labada gole ka shaqeeyeen oo Madaxweynaha ka soo noqdey maaha ineynu halkoodii ka soo bilowno oo aynu xaga hoose dhigno, Xeerka Booliiska oo kale hawl badan baynu galiney, wax badan baynu ka qabaney, markaa waxaan soo jeedinayaa in Xeerarkaa Madaxweynaha ka soo noqdey xaga hore soo galaan.

Ill-maadeerayaalow Xildhibaaneynu naheye yaana diba la inaga hagin, hadii dibada la inaga hagayo dee inaga dareeriya meesha oo kuwaa in hagaya aynu u baneyno, dadkana ayaan madaxa la isu galin, hadii goboladii la iska horkeeno waa dhibaato, doorasheynu galeynaa umad isku cod ah ayaynu dooneynaa, umada la qeybiyay oo la isku hor keenay oo reerba reer dabada loo sudhey doorasho gali karimeyso, waliba qoladeena asxaabta ee codka dooneysaa yaynaan Gobolada isku xoqin.

**Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** Bismilaahi, anigu waxaan qabaa Xeerkan Caasimada iminka sidatan uu yahey maaha sidii habooneyd, wuuna iska iman doonaa, laakiin hadii la iskaga dhago oo maalina ajendaha loogu horeysiiyo maalina xaga hoose la dhigo waa ixtiraam daro oo Xeerka Caasimada markiisa ayuu ixtiraamkiisa leeyahey, iminkana inaga socon mayo arrimo farsamo dartood, bari dhoweyd town plan ha la sameeyo ayaa la yidhi markii dhinaca galbeedka Gabiley la qabtey wixii reer gabiley ahaa waxay yidhaahdeen ma anaga na lagu soo durkayaa, markii dhinaca kale la tageyna sidaas oo kale ayay yidhaahdeen ma anagaa na lagu soo durkayaa, marka wali xeerkaasi looma diyaar aha.

Waxa kale oo dhan waxaan ku waafaqsanahey C/qaadir Jirde, waxa weeye marka Argagixisada la yidhaahdo maaha wax dambi caadi ah oo crime ah, argagixisadii waxay noqotey wax organized ah, adag, awood dhaqaale leh oo international la maamulayo, isla markaana dad mu fakiriin ah dabda ka wadaan, sidaa darteed waxa weeye in argagixisadu iney tahey cilmi cusub oo loo baahan yahey in la barto Xeerarkeeda u gaarka ahna in la diyaariyo.

Xeerka Ganacsiga Bangiyada, yaan la is yeel yeelin waxaynu nahey umada aduunka ka mid ah oo waxyaabo faro badan la wadaagta aduun weynaha, kuwii islaamiga ahaa waa inoo joogaa, kii kalena waa inoo joogaa, dadkii joogey dhulka barakeysan sida xaakimul xarameynkii ayaa isticmaalayaoo agtiisa taal, anigu garan mayo wax lagu diidayo, marka waxaan soo jeedinayaa arrinta ha la daayo oo dhulka ha la dhigo si ganacsigeenu u noqdo mid caalamiya, yaynaan isku koobin, wixii kale Xildhibaan Jirde ayaan ku raacsanahey.

**Md. Naasir X. Cali Shire:-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanada Sharafta leh waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, run ahaantii hadalka intiisii badneyd waxaa qaatey xildhibaanada, waxaan ka hadlayaa saddhex arrimood:-

- Waxaa Ajendahan ku qoran **Xeerka Hay’adda Wadooyinka (Somaliland Road Authority),** Golahan Wakiilada waxaa hore uga baxay Xeer Takaaliif Golaha la keenay oo loo qabtey mudo sanad ah loo qabtey, markaa waxaa Shir-gudoonka ka codsaneynaa in maadamaa wakhtigii dhamaadey si dib u eegis loogu sameeyo la keeno, waayo waxaa shuruudaha isna aynu ku darney in Xeerkan la keeno,

waxaana lagu qorey numberka sideedaad ee ajendaha markaa isna waxaan jeclaan lahaa in kuwa ugu horeeya laga dhigo.

- **Xeerka Ganacsiga Baananka,** anigu shakhsiyan waxaan aaminsanahey in Xeerkaas madaama uu Commercial Bank waxaa soo socda Baanan farabadan oo waxaad meelahaa ku arkeysaa iyadoo lagu xayaysiinayo premium Bank, waxaynu u baahanahey wiixii lagu maamuli lahaa Baanankaa cusub ee imanaya, markaa waxaan soo jeedinayaa Xeerka ha la daayo oo waliba kuwa ugu horeeya aynu ka dhigno.

- Arrinta Xildhibaanadu ka hadleen waxaan ku raacsanahey Xildhiban C/qadir Jirde iyo Xidlhbaanadii ka horeeyayeek a hadley**Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqdey,** Xeerarkaas oo tacab iyo wakhti badan galiney, waxaan ka codsanayaa shir-gudoonka in la soo hor mariyo iyaga, waad-mahadsan tihiin.

**Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhaari):-** Bismilaahi Raxman Raxiim, waxaan rabaa inaan xuso saddex Xeer:-

- **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada,** Malaha saddexdii sano ee u dambeeyay ajenduhu ku jirey melena ma gaadho, markaa hadaaney Gudiddii Joogtadu keenay Golaha u sheega oo yaynaan ku daalin.

- **Xeerka Ganacsiga Bangiyada,** waxaan taageersanahey oo sharciga iyo sheercada islaamka ka soo horjeeda oo dadka dareenkooda khilaafsan Xeerka Ganacsiga Bangiyada ee Ribada ah, waxaan ka soo horjeedaa nin baa yidhi shacabku yayna ina maamulin, shacbigu waa kuwa aynu wakiilka nahey, wixii dareenkooda inay inoo sheegaan xaq bay u leeyihiin hadey gobolada joogaan iyo hadey baadiyaha joogaanba, wax diinta ka soo horjeeda hadeynu sameyno Illaahey baa inagu ciqaabaya, shacbiguna wuu inagu diidan yahey, markaa ninkii u jeedo gaar ah ka wata yaan shacbiga muraadkaaga ha jiidhsiin, Xeerkaana hore ayaa looga hadley, meel baa la dhigay, wixii ajendaha loogu soo daro oo la soo celiyo waxa weeye in Golaha muran iyo hadal laga abuuro.

- **Xeerka Argagixisada,** waxaan raacsanahey in falka argagixisadu yahey dhibaato aduunka ku cusub maanta, qaab ayaana loola tacaalaa, laakiin waxaa qabaa iyadoo lala tacaalayo inaynaan inagu si gaar tooshka isugu ifin, Wadamadan la tacaalaya ee gawaadhida buleit proof-ka ah sameystey inaga inama aqoonsana, jiritaankeena ma aqoonsana, laakiin waxay doonayaan inay inaga ina cadaadiyaan, waxa weeye inaga wixii inaga yimaada iyo dareenka nimankaas

argagixisada inaga qabaan ayaynaan toosh ku shidin, aduun aan ina ogoleyn oo aan ina ictiraafsaneyn hor orodkiisa iyo hay'ad baa wadata aynu iska deyno.

**Sixitaan Md. C/qadir Jirde:-** Xeerka Argagixisada inagu meynaan curine wuxuu inooga yimi Xukuumada, marka khasab bay inagu tahey ineynu eegno.

**Md. Saleeban Bukhaari (sii watey hadalka**)

- **Xeerka Kufsiga,** galmada Xaaraanta ah xoog iyo khasab ha ahaadaan ama ogolaansho ha noqotee waa xaaraan ay shareecadeenu xaaraameysay, waxayna ku yaaliin Xeerka Ciqaabta Guud, hadey tahey sidaa Xildhiban Xaamud sheegay uu ku darsado khasab iyo xoog ah waa lala dagaalamayaa oo sharciga la marinayaa oo waxaa la goynayaa gacmaha iyo lugaha, marka waxa weeye in Xeer gaar ah laga dhigo kufsiga oo Xeerkii Ciqaabta Guud ha laga saaro waxa weeye ujeedo gaar ah oo hay'addo dabada ka wadaan oo budget ku sameysanayaan, markaa in Goleheena la soo mariyo laga wanaagsan ee Xeerka Ciqaabta Guud ha loo daayo hadii wax lagu darayona kaas ha la dhex galiyo.
- **Xeerka Caasimada,** xeerka ku fogaan mayo, reer Hargeysow laba kala daaya waa caasimad iyo subax walba ka baxa, waxaan soo jeedinayaa qodob, Somaliland halka ugu munaasibsan ha la geeyo tani waa ku meel gaadhe oo waliba ha laga dhigo Magaalada Ceergaabo oo ah halkaan ka soo jeeday.

**Sixitaan Md. C/qadir Jirde:-**Gudoomiye wuxuu taabtey dadkaan wakiilka ka ahey, waxaan leeyahey Saleebaan waxaanu kaa balan qaadeynaa hadaanu nahey reer Hargeysa in nin reer Ceergabo ah aanu ka dhigno Maayarka.

**Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-**Shir-gudoonka, Xubnaha Golaha, Xogheynta iyo Saxaafada waan salaamayaa, Gudoomiye Anigu waxaan leeyahey:-

- Xeerka Ganacsiga Baananka ha la soo hor mariyo oo loo codeeyo ayaan soo jeedinayaa.
- Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada dee diyaarba nagama ah marka ajendaha ha laga reebo.
- Xeer-hoosaadka Golaha isagu wuu ina daaliyaye bal doorkan Ajendaha aynu ka saarno oo aan iska dhigno ka dambe ha lagu soo daro.
- Xeerka Ka-hortaga Kufsiga isna waxaan soo jeedinayaa ha laga saaro wuxuu ku jiraa Xeerka Ciqaabta Guud ayuu ku jira, hadii wax lagu darayona Xeerka ha la keeno.

- Xeerka Maareynta Maaliyada, Xeerka Hantidhowrka, Xeerka Somaliland Road Authority iyo Xeerka Ilaalinta Deegaanka waan soo dhoweynaya iyaga oo sidooda ajendaha ha loogu daayo.
- Xisaab Xidhada 2014 iyo 2015kii in la keeno waan soo dhoweynayaa.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
----------------------------------------